




Tr. 27<sup>ka</sup> Janaayo 2016

## GO'AAN KA SOO BAXAY GOLAHA SHACABKA.

1. Golaha Shacabka oo qaddarinaya Go'aankii Baarlamaanka iyo Golaha Wasiirada Taariikhdu markay aheyd 28<sup>kii</sup> Luulyo 2015 Qaraarkii Golaha Shacabka ee lagu dhisay Madasha Wadatashiga 2016, Habraaca Nidaamka Madasha ee lagu heshiiyey in uu hago wadatashiga, Qaraarka Hiigsiga 2016 ee summadiisu tahay *GSH/25/15*.
2. Arkay in Madasha Wadatashiga aysan wali ka soo bixin hannaan doorasho oo laysku waafaqsan yahay, waxaana sidoo kale go'aankan ku cadeyneynaa ineysan jirin hannaan doorasho (Electoral Model) oo soo gaaray Golaha Shacabka oo ay isla go'aansadeen Madaxda Sare ee hay'adaha Federaalka Jamhuuriyadda Soomaaliya.
3. Wuxuu Golaha Shacabka ka sugayaa Golaha Wadatashiga Qaranka inuu Golaha Shacabka u soo jeediyo tabta ugu habboon ee loo jiheyn karo Nidaam-siyaasadeedka looga gudbayo Agoosto 2016, sida ku cad Qodobka Koowaad ee Qaraarka Dhisidda Golaha Wadatashiga ee Sumaddiisu tahay *GSH/22/15* ee 16<sup>kii</sup> Sebteembar 2015.
4. Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soo dhaweynayaa hannaan doorasho looga gudbo Agoosto 2016 oo ku yimaada wadar-oggol, isla markaasna lasoo marsiiyo hay'adaha Dastuuriga Qaranka si loo waafajiyo Dastuurka iyo Nidaamka Sharci-dejinta Soomaaliya.
5. Waxaa laga digayaa in marna aan laysku dayin go'aan qaadasho siyaasadeed garab marsan Hannaanka Wadar-oggol loo dhan yahay ayadoo tala kasta oo laysla meeldhigana in aysan wax u dhimin qoddobada soo socda:

Page 1

- a. In aysan wax u dhimin midnimada Qaranka iyo Wadajirka Shacabka Soomaaliyeed;
  - b. In aysan keenin xasilooni darro siyaasadeed iyo mid amni oo dalka u horseedi karta colaado cusub;
  - c. In la waafajiyo Dastuurka ayadoo la soo marayo hay'adaha Dastuuriga Qaranka ah oo ay khuseyso.
6. Guddoonka Golaha Shacabka waxaa la farayaa in go'aankan si deg deg ah ku gaarsiiyo Hay'adaha Dastuuriga ee heer Federaal, Dowladda Gobolleedyada, Maamullada KMG iyo Beesha Caalamka.



**M. ne Muxammad Sh. Cusmaan Jawaari**  
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

